



Ardeyda Caalamiga ah ee Waxbaashada U Jooga Iyo Lambarka Bulshada

Miiska ku jira

Sharciga aad waddanka ku joogto	2
Shuruudaha shaqada	2
Da'da	2
Aqoonsiga	3
La Xiriirka Lambarka Bulshada	3

Ma waxa aad u joogtaa Mareykanka si ku meel gaar ah oo aad dhiganeyso jaamaca, barashada luqadda, tababar, oo aad ku joogtaa fiisaha **F-1, M-1, or J-1** ee ardaynimada? Waxaa laga yaabaa in dugsiga aad dhigato ku weydiiyo Lambarkaaga Bulshada. Jaamacadaha qaarkood waxa ay Lambarka Bulshada u isticmaalaan aqoonsiga ardayga. Haddii aadan heysn Lambarka Bulshada, kuliyaada ama jaamacadda waa in ay ku siiyaan lambar aqoonsi ah.

Lambarka Bulshada waxaa inta badan la siiyaa dadka in ay ka shaqeeyaan Mareykanka. Lambarka Bulshada waxaa loo isticmaalaa in dawladda lagu soo wargeliyo dakhliga qofka soo gala go'aana looga gaaro in qofku xaq

u leeyahay macaashka Lambarka Bulshada. Lambarka Bulshada laguma siinayo si aad kuliyaad ama jaamacad isaga diiwaan geliso.

Haddii aad dooneyso in aad ka shaqeyso jaamacadda, waa in aad la xiriirtaa maamulka ardayda dibadda qaabilsan. Maamulka ayaa kuu sheegaya in aad shaqeyn karto jaamacadda kuuna sheegi kara shaqooyinka aad heli karto. Sidoo kale, waxaa laga yaabo in jaamacaddu kuu ogolaato in aad shaqeyn karto saacado go'an, sida ay ogol yihiin Wasaaradda Arrimaha Gudaha (DHS). **Haddii lagu ogaaldo in aad shaqeyso oo aad ka soo baxdo shuruudaha Lambarka Bulshada ee lagu faahfaahin doono qeybta soo socota, waxaa lagu siinayaa Lambarka Bulshada.**

Guud ahaan, dadka aan heysan dhalashada ee DHS u ogolaatay in ay ka shaqeeyaan ayaa codsan kara Lambarka Bulshada. Waxaanu kugula talineynaa in aad sugto 48 saacadood ka dib marka aad tagto jaamacadda ka hor inta aadan codsan Lambarka Bulshada. Sugitaanka waxa uu kaa caawinayaa in aan DHS ka xaqiijino sharcigaaga.

Si aad Lambarka Bulshada ugu codsato Xafiiska Lambarka Bulshada ee degaankaaga:

- Buuxi application for a social security cardcodisga kaarka Lambarka Bulshada
- Adiga oo keenaya warqadaha asalka ah ee ilmaha adiga oo caddeynaya:
 - Ogolaashaha shaqada; iyo
 - Da'da; iyo
 - Warqadda Aqoonsiga.

Sharciga aad waddanka ku joogto

Si aad cadeyso sharciga aad wadanka ku joogto, waa in aad keentaa baasaboorkii aad waddanka ku soo gashay iyo diiwanka Gelitaanka/Bixitaanka ee (Foomka I-94), haddii aad heli karto. Ardayda heysata F-1 ama M-1 waa in ay soo bandhigaan Foomka I-20, *Certificate of Eligibility for Nonimmigrant Student Status* (Form I-20 (Caddeynta Ogolaashaha Shaqada ee Ardayda Ajnabiga Ah)). Haddii aad ku timid fiisaha J-1 ama J-2 ee is weydaarsiga booqashada, waxa kale oo lagaa doonayaa in aad na tusto, *Certificate of Eligibility for Exchange Visitor Status* (Foomka DS-2019.)

Shuruudaha shaqada

Haddii aad heysato F-1 ee ardaynimo oo ka soo baxdo Shuruudaha shaqada, waa in aad waraaq qoraal ah ka keentaa maamulka dugsiga oo laguugu:

- Aqoonsanayo;
- Cadeyneysa xaaladaada waxbarashada; iyadoo
- Cadeyneysa cidda shaqada ku siineysa iyo nooca shaqada ee aad qabaneyso.

Waxaa kale oo aan kaa dooneynaa cadeyn ku saabsan shaqaaleynta, sida qeybta dambe e jeegii ugu dambeeyey ama waraaq lagu soo qoro. Warqadda waa inuu saxiixaa horjhoogahaaga oo taariikhda ku qoraa. Waraaqda waa in lagu faahfaahiyaa:

- Shaqadaada;
- Taariikhda bilowga shaqada;
- Saacadaha aad shaqeneyso, ama shaqeyn doonto ama aad shaqeyneyso; iyo
- Magacaga iyo telefoon lambarka horjoogahaaga.

Haddii aad tahay arday fiisaha F-1 ku jooga loona ogolaaday inuu shaqeyn karo taasoo qeyb kla ah manhajka (CPT), waa in aad keentaa Foomka I-20 ee aad buuxisay bogga shaqada oo maamulka dugsigu saxiixay.

Haddii aad tahay arday fiisaha F-1 ku jooga oo heysta ogolaashaha shaqada (Foomka I-766) ee DHS waa in aad keentaa.

Haddii aad tahay arday ku yimid J-1, ardayda shaqada ku meel gaarka ah, ama booqashada caalamiga ah, waa in aad keentaa warqadda marti gelinta. Warqadda waa in ay ku qoran tahay warqadda rasmiga ah ee marti geliyaha ee ogolaashaha shaqada.

Ma qabaneyno codsigaaga haddii aad:

- Shaqada jaamacadda ama CPT ay bilaabaneyso 30 maalmood ka dib taariikhda codsiga; ama
- Taariikhda aad shaqada bilaabeyso ee ku qoran ogolaashaha shaqada ee DHS (Foomka I-766) ay tahay mid mustaqbalka ah.

Da'da

Waxaa waajib kugu ah in aad keento shahaadada dhalashada ee wadamada kale haddii aad heysato ama ku heli karto 10 cisho gudahood. Haddii aanay sidaas aheyn, waxaa kale oo aan tixgelin doonaa aqoonsiyada kale sida baasboorkaaga ama aqoonsi kale oo ay bixisay DHS cadeyn ahaan da'daada.

Aqoonsiga

Waxa aan ogolahay dokumeentiga qaarkiis oo kaliya inay cadeyn u noqon karaan in lagugu aqoonsado. Aqoosniayadaas waa in ay noqdaan kuwo aan taariikhdoodu dhamaan (dhicin) magacaaga, waxyaabaha lagugu aqoonsan karo iyo sawirkagana la socdo. Lambarka Bulshada waxa ay ku weydiisanayaan in ay arkaan baasbaorkaaga oo aan weli dhicin iyo aqoonsi ay bixiso DHS.

Aqoonsiyada oo dhan waa in ay noqdaan asalkii ama nuqul laga soo shaabadeeyey hay'adda soo sarta. Ma ogolaaneyno nuqul ama nuqul leh shaabadda xaqiijiyaha (nootari) Ma ogalaan karno caddeyn muujineysa in aad codsatay aqoonsiyada.

Waxaa laga yaabaa in aan hal qoraal ama aqoonsi u adeegsano labo ujeedo. Tusaale ahaan, waxaa suurogal ah in shaabadda lagu dhufto baasaboorka ay cadeyn kuugu noqon karto aqoonsi iyo ogolaashaha shaqada.

Kuma weydsiisaneyno in aad heysato Lambarka Bulshada ka hor inta aadan shaqo bilaabin. Hase yeeshee, Waaxda Adeegga Canshuuraha ayaa ka dooneysa in goobta shaqada ay soo sheegto mushaharka ay ku siiyaan iyaga oo isticmaalaya Lambarka Bulshada. Inta aad sugeyso Lambarkaaga Bulshada, goobta shaqada waxa ay isticmaali karaan warqadda aad kuu soo dirno ee caddeyneysa in aad codsatay lambarka. Goobta shaqada waxa ay isticmaali karaan aqoonsiga socdaalka ee caddeynta u ah in lagu ogoladay in aad ka shaqeyn karto Mareykanka. Goobaha shaqadu waxa ay macluumaadk ka heli kartaan barta internetka ee www.socialsecurity.gov/employer/hiring.htm.

La Xiriirka Lambarka Bulshada

Waxaa jira dhawr hab oo loola xiriiri karo Lambarka Bulshada, oo ay ka mid tahay barta internetka, telefoonka iyo in aad tagto xafiiska. Halkan waxa aan u joognaa in aan ka jawaabno su'aalahaaga oo aan kuu adeegno. In ka badan, Lambarka Bulshada waxa ay caawiyeen si ay

maanta iyo mustaqbalka ugu guuleystaan iyagoo u fidiyey gargaar dhaqaale malaayiin dad ah oo halgan ugu jira nolosha.

Booqo bartayada internetka

Sida ugu haboon ee meel kasta loogala soo xiriiro kaaro Lambarka Bulshada waa adiga oo soo booqda www.socialsecurity.gov. Halkaas oo aad:

- Ka sameysan *my* Social Security xisaab oo aad kala socoto *Social Security Statement* (*Warbixinta Lambarka Bulshada*), ka hubiso lacagta aad shaqaysay, aad ka daabacan karto warqada xaqiijinta macaashka, ka bedeli karto lacagta bangiga laguugu shubo, aad ka daabacan karto foomka SSA-1099/1042S iyo kuwo kale;
- Ka codsan karto caawinaad dheeraad ah (Extra Help) ee ku saabsan daawada lagu qoro ee ceymiska caafimaadka ee Medicare;
- Waxa aad ka coddsan kartaa hawlgabka, naafada, iyo macaashka Medicare;
- Aad ka hesho nuqul ka mid ah daabacaadaha aan soo saarno;
- Aad ka hesho jawaabaha su'aalaha markasta la is weydiiyo; iyo
- Iyo kuwo kale oo dheeraad ah!

Adeegyada qaarkood waxa aad ku heli kartaa afka Ingiriisiga oo kaliya. Soo booqo barta Luqadaha kala duwan oo aad macluumaadka ku heli karto Af Soomaali. Waxaanu idiin heli karnaa tarjubaano lacag la'aan ah oo idinka caawin kara waxyaabaha aad uga baahan tihiin Xafiisyada Lambarkaaga Bulshada Waxa aan kuu heli karnaa tarjubaan haddii aad na soo wacdaan ama aad soo booqataan Xafiiska Lambarka Bulshada.

Nagala soo xiriir

Haddii aadan heli karin internetka, waxaa jirta adeegyo dhameystiran oo aad telefoonka ku heli karto, 24ka saac, 7da cisho ee todobaadka. Nagala soo xiriir telefoonka lacag la'aanta

ah ee **1-800-772-1213** ama numberka TTY,
1-800-325-0778, haddii aad dhagaha la' dahay
ama maqalku kugu adag yahay.

Haddii aad dooneyso in qof aad la hadasho,
waxa aan telefoonka ka jawaabnaa
inta u dhaxeysa 7da aroornimo ilaa 7da
fiidnimo Isniinta ilaa Jimcaha. Waxaanu ku
weydiisaneynaa in aad dulqaadato mudada aan
mashquulsanahay oo telefoonadu badan yihiin
ama aad mudo dheer khadka ku jirto. Waxaanu
rajeyneynaa on aan kuu adeegno.



Securing today
and tomorrow

Social Security Administration

Publication No. 05-10181-SO | August 2017

Ardeyda Caalamiga ah ee Waxbaashada U Jooga Iyo Lambarka Bulshada

International Students And Social Security Numbers (Somali)

Produced and published at U.S. taxpayer expense

Waxaa lagu soo saaray oo lagu daabacay lacagta canshuur bixiyayaasha